



*Monday, March 14, 2022*

**Waxyaabihii ugu danbeeyay Qaabka Tartiib-tartiibta ah ee Qaadidda Istiraatiijiyadaha Yaraynta Cudurka Safmarka ah**

Bulshada BC ee Qaaliga ahey,

Tani waa xasuusin ku saabsan in aan bilownay aragtida in kiisaska COVID-19 ee degmadeenu soo yaraanayaan. Xogta aan ka helayno goobaha dugsiyadeenna iyo Brooklyn Park iyo goobaha Brooklyn Cente waxay noo sheegayaan in aan gaarnay heer ay ammaan in la qaado qaar kamid ah istiraatiijiyadaheenna yaraynta cudurka safmarka ah.

Maanta waxaan soo gabagabaynay la socoshada xiriirka ee aan ka samanaynay degmada oo dhan si aan shaqaalaha ugu ogolaano awood ay ku kordhin karaan kuna taageeri karaan dadaaladeenna si aan ugu soo laabanno qaabkii waxbarasho ee jirtay kahor inta uusan cudurka safmarka ah imaan. Arintaan micnaheedu waa i aanaan dib danbe u samayn doonin wareysiyada xog aruurinta ah si aan go'aan uga gaarno khattarta cudurka ee ka dhex jirta ardayda iyo shaqaalaha. Horay ayaana u soconaynaa, waalidiinta Brooklyn Center Elementary STEAM waa lasoo wargalinayaa haddii arday katirsan fasalka canuggooda laga helo cudurka. Waxaan go'aankaan u gaarnay anaga oo u sababynayna xaqiiqada ah in marka la joogo dugsiiga hoose, ardaydu ay isla joogaan maaliinkii oo dhan dhammaan inta ay kujiraan xiisadhooda iyo howlahooda. Waxaan shaqaalaha iyo ardayda u sheegaynaa in ay sii wadaan kusoo wargalinta kalkaalisooyinka yaga xaaladaha cudurka laga helo. Waxaan sii wadi doonaa in aan la soconno xaaladaha nala kusoo wargaliyo bogga internetka ee degmada xogtana aan u gudbinno Waaxda Caafimaadka Minnesota.

Intaa waxaa dheer, laga bilaabo maanta, shardi uga dhigi mayno taageereyaasha cayaaraha iyo howlaha aan waxabarashada kamidka ahayn in ay la yimaadaan caddaynta tallaalka. Wakhti xaadirkaan, maaskarooyinka waa laga rabaa taageereyaasha, ardayda, iyo shaqaalaha ka qaybgalaya howl kasta oo cayaaro ku saabsan ama waxabarashada ka baxsan oo ka dhacaysa goobaha degmadu leedahay.

Waxaan rajaynayaa: Maadaama aan kasoo laabanayno fasaxa gu'ga, in hoggaanka degmadu la socon doonaan heerarka kiisaska iyo xogta ku saabsan guud ahaan degmada. Waxaan qorshaynaynaa in aan shardiga maaskaraha qaadno Isniinta, Abriil 11, 2022 haddii xogta la helo ay xoojiso go'aankaan. Ayada oo la raacayo isbaddalkaan, maaskarooyinka waxay noqon doonaan kuwo lasoo jeediyo laakiin aan shardi la iskaga dhigin marka la joogo goobaha degmada.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo [bogga wararka degmada](#) .

Daacda kuu ah,

Dr. Carly Baker, Kormeere guud